# Soo Koobitaan

## Soo Koobitaanka Fulinta

Mashruuca Boostaajada Sound Transit's Boeing Access Road wuxuu ku dari doonaa boostaajo cusub oo horumar lagu sameeyay wadada Layn 1 ee Wadada Tareenka ee u dhaw Wadada South Boeing Access, East Marginal Way, iyo Interstate 5 (I-5) oo ku yaala Tukwila. Goobta boostaajadan waxaa lagu daray qorshaha nidaamka cod bixiyuhu- ansixiyay Sound Transit 3 (ST3).

Sound Transit waxay qabatay dhowr hawlood si ay uga qaybgalinayso xubnaha bulshada.

Bishii Maarso ilaa Maayo 2024, waxaanu qabanay todobo waraysi oon la yeelanay bulshada. Hadafka kuwan waraysiyadan waxay ahayeen in lagu bixi macluumaadka mashruuca, xiriiro wanaagsan lala dhiso bulshooyinka deegaanka, lalana socodsiiyo Bulshada Qorshaha Kaqaybgalka iyo Isgaarsiinta. Waxaan la hadalnay xubnaha bulshada iyo wakiilada ururada ku saleysan bulshada. Inta lagu jiro muddada wareysiyada, dadku waxay sheegeen rabitaankooda ku aadan adeegsashada boostaajada, ayadoo loo maraayo ku xirnaanshaha baska, iyo u gudbida goobaha muhiimka ah.

Waxaan qabanay bandhig furan oo khadka onlaynka iyo xog aruurin laga bilaabo Luulyo 2 ilaa Luulyo 28. Bandhiga furan ee onlaynka ah waxaa lagu wadaay macluumaadka, mashruuca, oo ay ku jiraan tixgalinada xulashada. Ujeedada xog aruurintu waxay ahayd helida fikirka xubnaha bulshada iyo walaacyada ay qabaan. Xog aruurinta waxaa ka qaybqaatay 279 shaqsi.

- **279 qof** ayaa buuxiyay **xog aruurinta khadka onlaynka ah** laga bilaabo Luulyo 2 ilaa Luulyo 28
- **127 qof** ayaa rukuntay wargalinada mashruuca
- In ka badan **45 qof** ayaa ka qaybgalay **bandhiga furan ee sida tooska ah loo tago**
- In ka badan **80 qof** ayaa ka qaybgalay **bandhiga 2 aad ee sida tooska ah loo tago**
- Waxaa lala kulmay dadka si loola yeesho **7 wareysiyada bulshada ah** loona **siiyo warbixin kooban**
- Waxaa **6,012 boosto** loo diray dadka deegaanka mashruuca u jira **1-mayl**
- Waxaa la helay **30,350 ka qaybgal** iyo **1,720 kamid ahna dadka waxay kaga heleen** baraha bulshada

Jawaab bixiyaasha xog aruurintu waxay xuseen in la xoojiyey helitaanka iyo amaanka dadka lugaynaya, baaskiilada wada, ama raacaya baabuurta ay yihiin tixgalinta ugu muhiimsan ee naqshadaynta waxayna u sahlaysaa dadka inay tagaan boostaajada. Jawaab bixiyaashu sidoo kale waxay sheegeen in nakhshadeynta boosteejadu ay tahay inay yareyso muddada dhismaha iyo carqaladeynta adeega tareenka fudud ee jira. Jawaab bixiyaashu waxay sheegeen in sare u qaadida helitaanka baarkinku ay ahayd tixgalinada naqshadaynta muhiimka ah.

Si lamid ah wadahadalka furan ee oonleenka ah, Sound Transit waxay sidoo kale martigelisay wadahadal guri furan iyo laba xafladood oo la isku imaaday. Shaqaalaha wacyigelinta ayaa hawsha ka qaybgeliyay in ka badan 125 qof dhamaan bandhigyadan.

Kasoo qaybgalayaasha munaasabadaha ayaa muujiyay taageerada guud ee ay u hayaan boostaajo ku taala agagaarka Wadada Boeing Access, East Marginal Way, iyo I-5. Dad badan ayaa muujiyay dookhooda ku aadan soo jeedinta goobta boosteedada ee ku taala East Marginal Way. Ka qaybgalayaasha ayaa sidoo kale sheegay in amaanka, badqabka, iyo gelitaanka ay noqdaan mudnaanta koowaad ee ay tahay in la siiyo dadka u safraya kana safraaya boostaajada, oo ay ku jiraan isku xirada baska iyo isha ku haynta cimilada. Sidoo kale waxaan maqalnay in dadku ay xiisaynayeen baarkinada iyo meelaha la dhigo/laga qaado dadka.

Waxaan kor u qaadnay munaasabadaha guriga wahadalka furan waxaana dhiirigelinay wacyiga mashruuca annagoo boostooyin u dirayna guryaha iyo ganacsiyada dhaw, anagoo iimayl u dirayna ururada bulshooyinka ku saleysan, soo gelinayna qoraalo warbaahinta

bulshada, sidoo kale wax kusoo dhijineyna meelaha bulshooyinka iskugu yimaadaan ayna ka jiraan ganacsiyada deegaanka. Baahinta wararka mashruuca iyo fursad ka qeybgalinta ayaa kasoo muuqday Urbanist.

Falcalinada bulshada, oo ay weheliyaan tixgalin farsamo, ayaa ka warbixin doonta sida aan horey ugu wadeyno mashruucaan iyo injineernimada fikradeed/dib u eegis deegaanka. Dabayaaqada sanadkaan, waan sameyn doonaa warbixin cusub oo ku saabsan warbixinada bulshada.